***Waxbarashada Bukaanka***

***Xarunta Koritaanka Dadka iyo Naafonimada***

# Kooxda Qiimaynta Ilmahaaga

*Ee Kiliinigga Koritaanka Ilmaha*

**Xaashidani waxay sharxaysaa kooxda kula shaqayn doonta adiga iyo ilmahaaga Kiliinigga Koritaanka Ilmaha ee Xarunta Caafimaadka ee Jaamicadda Washington (UWMC). Kiliniggani wuxu qayb ka yahay Xarunta Koritaanka Dadka iyo Naafonimada.**

## Kiliinigga

Kiliinigga Koritaanka Ilmaha wuxu siiyaa adeegyada cilad-baadhista, qiimaynta iyo talooyinka carruurta ay qoysaskoodu qabaan walaacyada la xidhiidha naafonimada koritaanka. Codsiyada araggu waxay ka yimaadaan xubnaha qoysaska, kalkaalisooyinka, dhakhtarada, dabiibayaasha, macalimiinta, iyo wakaaladaha adeegyada bulshada. Badi ahaan, waxaan aragnaa carruur da'doodu tahay 3 illaa 15 sanno jir, laakiin mararka qaar waxaan aragnaa carruur ka yaryar ama ka waaweyn. Badiyaa waxaan aragnaa carruur hore loogu soo fiiriyey daryeel bixiyayaashooda koowaad (dhakhtaradooda) iyo barnaamijyada dugsiga.

## Kooxda Qiimaynta

Qaar ama dhmmaan bixiyayaasha daryeelka caafimaad waxa laga yaabaa inay ka shaqeeyaan daryeelka caafimaadka ilmahaaga:

- **Kalkaalisada kiliinigga** ama **kalkaaliye caafimaad** dhererk ilmaha, culayska, masaaxadda dhakada, ama dhiig-karka.
  wuxu qiyaasaa
- **Dhakhtarka korsiimada carruurta**, dhakhtar u tababaran naafonimada koriinka, wuxu qaadaa taariikhda caafimaadka qoyska oo wuxu samayaa baadhitaan dhan oo jidh iyo dareemadaba ah. Dhakhtarkani wuxu kaala hadli doonaa aragga takhasusyada kale ee caafimaadka.
- **Dhakhtarka cilmi-nafsiga** wuxu qiimeeyaa kartida ilmaha ee xallinta dhibaatooyinka iyo xirfadaha bulshanimo, iyo weliba horumarkooda aqooneed, xusuusta, iyo saxada niyadda. Qiimaynta cilmi-nafsinimo badiyaa waxay tahay baadhitaano aasaasi ah iyo u-fiirsashada dabeecadda ilmaha. Midda kale waa lagu warsan karaa oo waxa lagu weydiin karaa inaad soo buuxiso xogururin.

University of Washington Medical Center
UW Medicine

The Center on Human Development and Disability

## Su'aalo?

Wac 206-598-3327

Su'aalahaagu waa muhiim. Wac dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaad haddii aad qabto su'aalo ama walaacyo. Shaqaalaha kiliinigga UWMC iyana waxay u joogaan inay ku gargaaraan.

Kiliinigga Koritaanka Ilmaha: 206-598-3327

Fagis "Fax": 206-598-7815

- **Dabiibaha** ama **daweeyaha jidhka** wuxu qiimeeyaa sida ilmahaagu sameeya *xirfadaha socsocdka dhamaystiran* sida socodka iyo boodboodka iyo *xirfadaha dhaqdhaqaaqa hufan* sida qabsashada iyo qoraalka. Qiimaynta waxa kale oo ku jiri kara fiiritaanka kartida ilmahaaga isaga oo ka qaybqaadanaya ciyaaraha, cunista, ama dhar-xidhashada. Xaalaynta dareemada iyana waa la qiimayn doonaa.
- **Nafaqeeye** wuxu weydiiyaa ilmahaaga qaadashada cuntadiisa iyo dabeecadihiisa cunista. Tamarta (kaaloriga) iyo nafaqada waa la xisaabin doonaa. Dhererka gacanta iyo qiyaasta labanlaabka jidhka waxa laga yaabaa in la geliyo xog.
- **Xirfadyahanka afka/hadalka** wuxu isticmaalaa baadhitaano kala duwan oo aasaasi ah oo wuxu la ciyaari ilmaha waxqabadyo uu ku qiimeeyo ilmaha horumarkiisa hadalka iyo afka. Xirfadaha dhagaysiga iyo fahamka (qabashada) iyo xidhiidhka (*ismacnaynta*) waa la qiimayn doonaa.
- **Xirfadyahanka dhegaha** (takhasus maqalka ah) wuxu baadhaa maqalka ilmahaaga inay sax tahay.
- **Shaqaale bulsho** wuxu kaala hadli doonaa himilooyinkaaga aad ka leedahay qiimaynta ilmahaaga iyo waxaad rajeynayso inaad ka faa'iido qiimaynta. Shaqalaha bulshadu waxa kale oo uu kaala hadli doonaa koriinka iyo dabeecadda ilmahaaga, jiidaha itaalka iyo xanibnaanta, iyo iska-warqabka. Shaqaalaha bulshadu waxa kale oo uu ku weydiin doonaa su'aalo la xidhiidha doorka qoyskaaga, xidhiidhka, dhaqanka waalidinimada, iyo aaminsanaata dhaqanka. Macluumaadkan waxa la siin doonaa kooxda si ay uga gargaarto fahamka walacyada qoyska, himilooyinka, iyo filashooyinka.

Kiliinigga Koritaanka Ilmaha wuxu ka haystaa deeq dawladda federaalka si uu u siiyo tababar sare xirfadyahanada caafimaadka. Adiga iyo ilmahaagu waxa mar walba idin arki doona shaqaalaha kiliinigga marka aad daryeen halkan ka heshaan. Dadka tababaranaya ee aad aragtaan waxa kormeeri doona shaqaalaha.

## Natiijooyinka Qiimaynta

Qiimaynta kadib, xubnaha kooxdu waa kulmi doonaan si ay uga wadahadlaan waxyaabahay heleen. Waxay ka bixin doonaan talooyin:

- Daryeelka caafimaad, oo ay ku jirto tijaabooyinka dawooyinka, iyo daaweynta kale
- Qorshaynta waxbarashada
- Khayraadka bulshada, sida kooxyaha taagera waalidiinta ama wakaaladaha adeega bulshada
- Khayraadka taageera natiijooyinka qiimaynta, sida u-gudbinta dabiibe ama takhasuska dabeecadaha
- Siyaabaha aad si hufan uga gargaari karto u-doodidda baahiyaha ilmahaaga

UNIVERSITY OF WASHINGTON
MEDICAL CENTER
UW Medicine

**Center on Human Development and Disability**
Box 357920
1959 N.E. Pacific St. Seattle, WA 98195
206-598-3327

© University of Washington Medical Center
Your Child's Assessment Team
Somali
01/2010
Reprints on Health Online: http://healthonline.washington.edu

# *Patient Education*

***Center on Human Development and Disability***

# Your Child's Assessment Team

*At the Child Development Clinic*

**This handout describes the team that will work with you and your child at the Child Development Clinic at University of Washington Medical Center (UWMC). This clinic is part of The Center on Human Development and Disability.**

## About Our Clinic

The Child Development Clinic provides diagnosis, assessment, and recommendations for children whose families have concerns about developmental disabilities. Requests for consultation come from family members, nurses, doctors, therapists, teachers, and social service agencies. Mostly, we see children who are 3 to 15 years old, but sometimes we see younger or older children. We usually see children who have already been evaluated by their primary care providers and school programs.

## The Assessment Team

Some or all of these health care providers may be involved in your child's care:

- A **clinic nurse** or **medical assistant** measures your child's height, weight, head circumference, and blood pressure.
- A **developmental pediatrician**, a doctor trained in developmental disabilities, takes a detailed family and medical history and does a thorough physical and neurological exam. This doctor will talk with you about any consultations with other medical specialists.
- A **psychologist** assesses your child's ability to solve problems and learn social skills, as well as their academic achievement, memory, and emotional well-being. A psychological assessment usually involves standard tests and behavioral observations of your child. You may also be interviewed and asked to complete questionnaires.

UNIVERSITY OF WASHINGTON
MEDICAL CENTER
UW Medicine

The Center on Human Development and Disability

## Questions?

Call 206-598-3327

Your questions are important. Call your doctor or health care provider if you have questions or concerns. UWMC clinic staff are also available to help.

Child Development Clinic: 206-598-3327

Fax: 206-598-7815

___________________

___________________

___________________

___________________

- An **occupational** or **physical therapist** evaluates how your child does in *gross motor skills* like walking and jumping and *fine motor skills* like grasping and writing. Assessment may also include looking at your child's ability to take part in activities such as play, eating, or dressing. Sensory concerns can also be evaluated.
- A **nutritionist** asks about your child's food intake and eating habits. Energy (calories) and nutrients may be calculated. Arm circumference and skin-fold measurements may be recorded.
- A **speech/language pathologist** uses many different standard tests and play activities to evaluate your child's speech and language development. Listening and understanding (*receptive*) and communication (*expressive*) skills will be assessed.
- An **audiologist** (a hearing specialist) tests your child's hearing in a very accurate way.
- A **social worker** will talk with you about your goals for having your child assessed and what you hope to gain from the evaluation. The social worker will also talk with you about your child's development and behavior, areas of strengths and limitations, and self-concept. The social worker will also ask you questions about your family roles, relationships, parenting practices, and cultural beliefs. This information will be given to the team to help understand family concerns, goals, and expectations.

The Child Development Clinic has a grant from the federal government to provide advanced training to health professionals. You and your child will always be seen by clinic staff when you receive care here. The trainees you may see will be supervised by staff.

## Assessment Results

After the evaluation, team members will meet to discuss their findings. They will then make recommendations for:

- Medical care, including tests medicines, and other treatments
- Educational planning
- Community resources, such as parent support groups or social service agencies
- Resources that support the assessment results, such as referrals to an occupational or behavioral specialist
- Ways to help your family effectively advocate for your child's needs

UNIVERSITY OF WASHINGTON MEDICAL CENTER
UW Medicine

**Center on Human Development and Disability**
Box 357920
1959 N.E. Pacific St. Seattle, WA 98195
206-598-3327

© University of Washington Medical Center
01/2010
Reprints on Health Online: http://healthonline.washington.edu